

Fiidnimadii sabtiga ee ay axaddu soo galeysay ee bishan febraayo 20ka ahayd ayaa waxaa si habsami ah u qabsamay kulan aaladda soomka oo ay soo diyaarisay Akademiye Goboleedka Af Soomaaliga AGA iyo Naadiga Qalinleyda iyo Halabuurka Soomaaliyeed ee SSPEN laantooda qaaradda Yurub. Kulanka oo sidii caadada u ahayd AGA iyo SSPEN ay sannad walba ku xusaan Maalinta Caalamiga ha ee Afka Hooyo oo ku beegan 21ka Febraayo ayaa waxaa ka qeyb galay masuuliyiinta sare ee AGA iyo SSPEN, macallimiin ka dhiga afka Soomaaliga dugsiyada ku yaalla dalalka Yurub, xeeldheerayaal afka Soomaaliga, waalidiin iyo dadweyne wuxuuna sidoo kale wuxuu toos uga socday barta Facebook ee AGA.

Halkudhegga guud ee munaasabadda ee sannad walba la qaato oo ah “U hiilli afkaaga hooyo” ka sokow waxaa sannadkan diiradda la saaray baridda afka hooyo ee carruurta Soomaaliyeed ee qurbaha ku kora, waxaana baaqu ahaa “Ballanteenu waa barashada iyo baridda af Soomaaliga”. Waxaa warbixinno laga dhegeystay macallimiin iyo barbaariyeyaal ku kala nool dalalka Ingriiska, Holland, Sweden, Norway, Denmark iyo Finland, waxaa la is tusay sida ay u jirto fursad weyn oo carruurteenu ku heli karaan in afka hooyo loogu dhigo dugsiyada iyo sida qurbajoogteenu aysan uga faa’ideysaneyn. Ka qeyb galayaasheenu waxay isweydaarsadeen weydiimo iyo doodo la xiriira arrinkaa iyo wixii xal noqon kara aayaha dhow iyo mid dheerba. Waxaa tusaale loo soo qaatay naadi ay macallimiinta Soomaaliga dhiga ee ku nool waddamada Scandinavia la isku yiraa oo waxtar weyn lahaa haddase aan sidii hore u shaqeyn, balse la isla gartay in dib boorka looga jafo.

Waxaa la soo jeediyey sidii AGA iyo SSPEN ay u dardargelin lahaayeen hawlaha laga wada hadlay una noqon lahaayeen cidda usha u sidda inta kalena ay kaalintooda ka qaataan haddii ay ahaan lahaayeen barayaal ama waalidiinta qurbajoogta ah.

Barnaamijka waxaa ibafuray Gud. AGA Dr. Maxamed Daahir Afrax oo waano iyo dardaaran ka sokow aad uga warramay aasaaskii iyo waxqabadkii labada hay’adood iyo hawsha weyn ee u qorsheysan. Waxaa isna kelmad qiima badan halkaa ka soo jeediyey lataliyaha sare ee AGA ahna Gud. Ku xigeenka koowaad ee SSPEN bare sare Mustafa Cabdillaahi Feyruus. Wuxuu ka warramay qorshayaasha dhow iyo kuwa fog ee labadaas hay’adood iyo weliba barnaamijka billaha ah ee Madasha AGA. Wuxuu uga mahadceliyey qabanqaabiyaashii iyo ka soo qeyb galayaashaa kulankaas aaladda fogaan-aragga ku qabsoomay. Barnaamijka oo uu si xirfadi ku dheehan tahay uu u xiriirinayey Bodhari Warsame ayaa waxaa gunaanadkii hadal dhiirragelin iyo tala bixinba ah ka jeediyey aqoonyahan Rashiid Sh. Cabdillaahi “Gadhweyne” oo ka tirsan xeeldheerayaasha AGA.